



**Barnaamijka Waxbarashada ee Is-Maamulidda Cudurka  
Daba-dheeraada  
Qoraalka Hoggaamiyaha Kooxda**

**Loogu Talagalay Kaliya Goobaha Aanan La Maalgelinin**

**Fadlan u akhri bayaanka soo socda ka qaybgalayaasha kahor dhammayntooda ee Tirakoobka Xogta Ka Qaybqaataha**

- Waxaad helaysaa Tirakoob ka kooban labo-bog, kaasi oo ikhtiyaari kuu ah umana baahnid in aad dhammeystirtid tirakoobka si aad u qaadatid siminarkan aqoon isweedaarsiga.
- Kahor inta aanan wadaagin xogta kugu saabsan, waxaan doonaynaa in aan sharaxno sida xogtaada loo isticmaalayo loona ilaalinayo.
- Xogtaada aad ayay qiimo noogu leedahay. Waxaan u isticmaalaynaa in aan ku ogaano qofka la gaarsiiyay barnaamijkan iyo hagaajinta adeegyadeenna. Waxay sidoo kale ku caawinaysaa wakaaladaheenna maalgelinteenna in ay muujiyaan in ay lacagtooda si caaqilnimo ah u kharash gareynayaan.
- Qaybta sare ee bogagga Tirakoobka, waxaan kugu wayddiisanaynaa magacaaga iyo hab kale oo lagugu aqoonsanaayo sida lambar ama naanays. Waxaan tani u isticmaalaynaa in waafajino xogtaada tan Diiwaanka Lagu Qoro Ka-qaybgalka si loo raadraaco inta jeer ee aad soo xaadiraysid fasalka. Lama wadaagayno magacaaga qof kale.
- Tirakoobka sidoo kale wuxuu ku wayddiinayaa in aad bixisid taariikhda dhalashadaada, koodhka deegaanka, iyo dheddig-labood. Macagyada iyo naanaysyada waa laga saarayaa wixii xog ah ee aad dooratid in la wadaago waxaa la gelinayaa xogta diiwaangashan CDSME qaranka ee badbaadsan. Kaliya xog urursan ayaa la isticmaalayaa, xogta shakhsi ahaaneed lama isticmaalayo.
- Waxaan raacaynaa sharciyo aad u adag si aan u ilaalino dhammaan xogtaada iyo si aan ugu dhigno mid khaas ah. Waxaan ka sii dhigaynaa foomamkan waraaqda ah kuwo badbaadsan anagoo raacayna hab-dhaqamada caadiga ah ee loogu talagalay ilaalinta xogta khaaska ah. Kadib marka qof tababaran uu geliyo xogtaada kumbuyuutar badbaadsan, waxaan baabi'inaynaa foomamka waraaqaha ah.
- Dhammeystirka Tirakoobka guud ahaan waa mid iskaa ah waxaadna ka boodi kartaa wixii su'aalo ah ee aadan doonayn in aad ka jawaabtid. Inta aad sameynaysid Tirakoobka, waxaad na wayddiisan kartaa in aad sharaxdid su'aalo kasta ee aad u aragto in lagu wareerayo.
- Haddii aad go'aansatid in aadan dhammeynin Tirakoobka waxaad wali ka qaybqaadan kartaa barnaamijkan.